Janaayo 16, 2026

Bulshada Dugsiga Sare ee Rainier Beach,

Waxaan ogsoonahay in walaacyo la xiriira badbaadada Dhismaha Cusub ee Dugsiga Sare ee Rainier Beach ay ka soo baxeen warbixin dhawaan ka soo iftiintay KUOW

Inkastoo sheekadu ay u muuqato mid dareenka kicineysa, waxaanu jecelnahay inaan idiin xaqiijino in Dugsiyada Dadweynaha Seattle (SPS) ay raaceen tilmaamaha badbaadada joogtada ah markii ay naqshadeynayeen oo dhisayeen dugsiga.

Sheekadu waa sax, waana run in la soo jeediyay in la tijaabiyo gaaska **methane** ka hor inta aan dugsiga la furin. Tijaabadaas waa la seegay, waana idinka raali gelinaynaa.

Kalsooni ayaanu ku qabnaa in dhismahani fiyow yahay. Tijaabooyinkii ugu dambeeyay ee SPS ayaa muujiyay inaysan ka jirin wax gaaska **methane** gudaha dhidmshs dugsiga. Waxaan sii wadi doonaa baaritaanka gaaska **methane.** Waxaan sidoo kale ka shaqeyneynaa inaan shaqaaleysiiyo shirkad naga madax bannaan oo tijaabooyin samaysa si loo helo kalsooni dheeraad ah. SPS waxa ka go'an inay bulashada la wadaagto natiijooyinka baaritaanka.

Dhammaan tallaabooyinka badbaadada ee la soo jeediyay ayaa qayb ka ahaa inta lagu guda jiray dhismaha. Hoos waxaanu ku qeexeynaa tallaabooyinkaas badbaadada iyo sida loo dhigay.

Haddii aad qabto su'aalo ama walaac, fadlan adeegso Let's Talk si aad ula xiriirto kooxda mashruuca.

Si daacad ah,

Dr. Kurt Buttleman

Kuxigeenka Kormeeraha Maaliyadda

Madaxa Hawlaha

---

## Sidee SPS u shaqeysay si loo hubiyo in dhismaha dugsiga cusubi bed qabo

### Xiligii Qorsheynta

- SPS waxay shaqaaleysiisay Maul Foster & Alongi (MFA), oo ah shirkad caan ah oo injineerinka deegaanka ah, si ay u baaraan goobta dugsiga.
  - MFA waxay ka heshay **ciid loo yaqaan peat** meelaha qaarkood.

    - Maadaama **<u>ciidda peat</u>** ay soo saari karto **<u>gaaska methane,</u>** tijaabooyin dheeraad ah ayaa la sameeyay.
    - Heerarka methane-ka waxay ka hooseeyeen heerarka ugu hooseeya dhammaan aagga tijaabada marka laga reebo hal mee loo keliya. Mid ka mid ah aagga tijaabada ayaa wax yar ka sarreeyay heerarka ficilka.
- MFA waxay SPS siisay talooyin ku saabsan siyaabo lagu yareeyo khatarta methane-ka.
- Talooyinkan waxay raacaan tilmaamaha badbaadada ee gobolka iyo federaalka.
    - In lagu rakibi nidaam lagaga sii daayo methane-ka dhismaha hoostiisa.
    - In lagu rakibo xayndaab dhumuc leh oo biyaha xejiya dhismaha hoostiisa.
    - Si joogto ah loo tijaabiyo methane-ka dhismaha ka dib.

**Naqshadeynta iyo Dhismaha**

SPS waxay ku dartay dhammaan talooyinka MFA markii la dhisayey dugsiga.

1. **Nidaamka Saaritaanka Methane-ka**
    - Nidaam hawo-marin ayaa lagu rakibay hoosta aasaaska shubka dhismaha.
    - Nidaamku si ammaan ah ayuu methane kasta kor ugu qaadaa oo kor uga saaraa saqafka.
    - Tani waxay ka hortagtaa methane inuu galo dhismaha.
2. **Xayndaabka Biyaha Ka adag (Waterproof)**
    - Xuub dhumuc leh oo biyo biyo ah ayaa lagu rakibay hoosta aasaaska.
    - Xuubkan ayaa xannibaya qoyaanka iyo methane-ka inuu galo dhismaha.

Hubinta tayada ayaa la sameeyay intii dhismaha lagu jiray.

- MFA waxay dib u eegtay naqshadeynta iyo rakibaadda nidaamka hawo-mareenka.
- Building Envelope Technology & Research (BET&R), oo ah shirkad la-talin ah oo ku takhasustay xayndaabka dhismaha, ayaa kormeertay xayndaabka biyaha biyaha si ay u xaqiijiso in si buuxda loo xiray.

**Kormeerka iyo Tijaabinta**

MFA waxay soo jeedisay in la tijaabiyo methane ka hor inta dadku u guurin dhismaha. Sababo la xiriira furitaanka marxalad, tallaabadan waa la seegay. Tijaabadu hadda way bilaabatay.

- Tijaabo la sameeyay 9-kii Diseembar, 2025, ma jirin methane gudaha iskuulka.
- Qalabka tijaabada wuxuu hubiyaa dhammaan gaasaska qarxa, oo ay ku jiraan methane.

Si bulshada loo siiyo kalsooni dheeraad ah, SPS waxay shaqaaleysiin doontaa MFA si ay u sii wadaan tijaabooyinka joogtada ah sanadka soo socda. Kadib, SPS waxay raaci doontaa qorshe tijaabo muddo dheer ah oo ku saleysan natiijooyinka MFA.